



Badgariir/Suunaami

Badgariirku waa taxane ah mawjado ama hirar waxyeelo leh oo saameeya xeebta. Badgariirka waxa badanaa dhaliya dhulgariir. Badgariirka waxa kale oo sababi kara dhulsiibad ah biyaha hoostooda iyo qarax folkaano oo ah biyaha hoostooda.

Khataraha badgariirka

- Mawjadaha badgariirka waxa abuuri kara dhacdooyin ka dhacay kumanaan mayl meel u jirta xeebaheena.
- Mawjadaha badgariirka joogoodu waxa uu noqon karaa ilaa 30 fiit marka ay xeebta soo gaadhaan; xaaladaha aad u daran waxay noqon karaa 100 fiit. Waxay gudaha dhulka soo gali karaan masaafu ah dhawr boqol oo fiit ilaa dhawr mayl.
- Badgariirku waxa uu sababi karaa taxane ah mawjado oo yimaada ilaa dhawr saacadood. Mawjadaha dambe way ka weynaan karaan mawjadaha hore.
- Badgariirku waxa uu ku socdaa xawaare ka dheereynaya inta uu qofku ordi karo.
- Badgariirku waxa uu leeyahay quwad weyn — oo ku filan inay dhaqaajiso dhagaxaan ah dhawr tan, doonyo iyo burbur kale. Guryaha iyo dhismeyasha wuu burburin karaa. Dadka waxa dili karaa ama dhaawici kara quwadda biyaha.

Sharaxaadyada badgariir

Maamulka Badda iyo Hawada ee Qaranka (National Oceanic and Atmospheric Administration) (NOAA) waxa uu soo saari karaa digniin badgariir gudaha 15 daqiiqadood ka dib dhulgariir.

Talo-bixin badgariir

- Talo-bixintu waxay sheegi karta halista badgariir suurtoagal ah oo laga yaabo inuu dhaliyo mawjado ama hirar khatar u ah kuwa ku jira ama u dhow biyaha.
- Dhegayso raadyahaaga, Idaacadda Cimilada ee NOAA, ama telefishanka ka daawo warka cusub.
- Hore u garo meesha uu noqon doono jidkaaga qaxidda ee ugu ammaan badan.
- Saraakiisha degmada ayaa go'aamin doona talaabooyinka haboon sida xidhista xeebta, dadka oo la saaro iyo maraakiibta oo dib loo meeleyo.

Warbixinta badgariirka

- Warbixintu waxay soo sheegtaa xaaladaha laga yaabo inay abuuraa badgariir.
- Dhegayso raadyahaaga, Idaacadda Cimilada ee NOAA, ama telefishanka ka daawo warka cusub ee ku jira warbixinta.
- Hore u sii ogow meesha uu noqon doono jidkaaga qaxidda ee ugu ammaansan.

Digniinta badgariirka

- Digniintu waxay sheegaysaa in laga yaabo in badgariir dhashay.
- U dhaqaaq aag sare ama gudaha dhulka.
- Haddii aan la heli karin aag sare, tag dabaqyada sare ee dhismeyaal shub ah.
- Sii wad inaad idaacadda degmadaada ama Idaacadda Cimilada ee NOAA kala socotid macluumaad iyo fariimo dheeraad ah.
- Sug fariinta leh “Way Dhammaatay” ka hor inta aanad ku soo noqon xeebta ama gurigaaga.

Waxa la sameeyo marka aad joogtid xeebta

Isla markiiba u carar aag sare; ha sugin digniin haddii:

- Dhulku gariiro.
- Aad maqashid qaylada digniinta.
- Baddu ay si la yaab leh dib uga noqoto khadka xeebta.

Raac calaadamaha qaxidda ee badgariirka

- Calaamado loogu talagalay jidka ka qaxidda badgariirka ayaa la dhigay jidka xeebta si loo tilmaamo jihada ah gudaha dhulka ama jihadda uu kaa xigo aag sareeya. Meelaha qaarkood, waxa laga yaabaa inuu jiro wax ka badan hal jid oo lagu aado aagag ammaan ah. Waxa laga yaabaa in jidadkaas lagu calaamadeeyay dhawr calaamadood oo muujinaya ikhtiyaaro dheeraad ah oo loogu talagalay qaxidda. Waa inaad taqaanid jidadka qaxidda ee loogu talagalay aaggaaga.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-
7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-036
Somali

